

Boqor Buur Madow Ma Waxaa Jeelka loo dhigay inuu yir 'Waar Tolow Colka Jooja'?

Waxaa Qoray: yuusuf A. Geele

Dhamaadkii qarnigii 19 aad iyo bilowgii kii 20 aad waxaa gobolka Togdheer ku noolaa gabyaa iyo afmaal la odhan jiray Salaan Carabey. Gabyaagu waxaa uu ka mid noqday guurtii loo saaray in ay kala dhexgasho colaad ka dhex qaraxday labo beel oo ay isxigeen. Labada beelood ayaa isu hub iyo ciidan urursaday, iyagoo dhegaha ka furaystay dadaalo badan iyo isku dayo looga codsaday inay ciidan beeledka kala qaadan oo xurgufta dhex taal ay wada hadal iyo geedka hoostiisa ku dhamatayaan. Waxaa salan Carabeey u muuqatay in mar haddii hadal iyo waano waxba tari weysay, bal inuu afkiisa maalo oo Tolkii u hoga tusaaleeyo halaaga ku jira dagaal sokeeyo iyo fool xumada adduunyo iyo aakhiro ee laga dhaxlayo dagaalka ay hurinayaan. Waxaa u dusha uga baxay faras uu lahaa, waxuuna horjoogsaday meel u dhaxeysa labada ciidan neeled ee isu muuqda. Halkaa waxa uu ka tiriyey gabaygii caan baxay ee dhextaalka uu uga dhigay **'War Tolow Colka Jooja'**, gabaygaa waxaa uu kaga waramay waxii rag ahaa ee labada jilib uga baxay dagaaladii hore iyo cidhib xumada laga helay dagaaladii hore u dhacay. Gabaygaa oo dhameystiran waxaad ka akhrisan kartaa buuga Himilada Maansda ee uu qoray Allah ha u naxariistee Aw Jaamac Cumar Ciise. Waxaa la soo weriyey in labadii ciidan beeled ay mar kaliya hubkii dhigeen oo colaadii lagu madhan laha ay halkaa ku dhamatay.

Malaha 100 sano iyo dheeraad baa arrintaa kor ku xusan laga joogaam goobtuna waa magaalada Carmo ee gobolka Bari oo lagu boqrayo Isim cusub oo ay yeelatay beel Soomaaliyeed oo ku dhaqan degaanka gobolka Bari. Boqor Buurmadw ayaaa oo ka mid ahaa marti sharaftii ka soo baqoolay Somaliland, ayaa fikirkiisa ku cabiray dhacdo ka dhacday magaalada Tuko Raq oo isku horfadhiyaan ciidamo iyo maleeshiyaad beelo ku kala abtirsada labada maaamul ee Puntland iyo Somaliland.

Arrintan ayaa ka dhalatay ka dib markii xurguf dhexmartay labo beel oo gobolka Sool u dhashay ay sideedii January ee sanadkan in ka faa'daysteen maleeshiyaad oo weerar gaadmo ah ku qabsadeen bar Kontorool oo ku taal Tuko Raq. Arrintaan ayaa markii danbe waxaa kusoo biiray ciidankii rasmiga ahaa ee Somaliland, iyagoo weliba sheegtay in ay ku sii jeedann Xadkii Ingiriisku xariiqay oo dhowr KM oo keliya u jira caasimada Puntland ee Garowe. Falkaa ay qaadeen maleeshiyaadka iyo ciidamada Somaliland waxy abuurtay saan saan colaadeed iyo isu habar wacasho aan wax badan ka duwanayn waxii uu ka gabyay Salan Carabay. Haddaba Boqor Buur Madow oo soo maray wadada ay isku horfadhiyaan ciidamada iyo maleeshiyeed beeedka arkanay khatarta soo socota ayaa munaasabadii caleema saarka kaga faa'idaystay

inuu diro baaq nabadeed oo Nuxurkiisa ahaa tii Salaan carabeey ee ‘War Tolow Colka Jooja’.

Haddaba waxaa yaab le in labo qolo ay weerar qaawan ku qaadeen boqorka oo ay weliba ku baaqeen in xabsiga loo dhaadhiciyo. Waa ayo labada qolo?

1. Waa koox aaminsan in Somaliland ay si qar iska xornimo ah ay dul istaagto xaduudkii ay xariiqeen Ingiriiska, waxayna aaminsan yihiin in maalinta xigta la aqoonsan doono Jamhuuriyadda Somaliland. Qoladani shaqadooda ma ah wixii dhinta iyo wixii ku burbura dagaalka ay ku baaqayaan in la huriyo
2. Qaar raba in Muuse Bixi fashilo oo farha la galo dagaal aan la ogayn maxsuulkiisa oo ay dhici karto in ammaanka lagu naaloonayo uu meesha ka baxo. Haddhowna Kornayl Muuse lagu eedeeyo dhibta meesha ka dhacda.

Waxaa xusid mudan in wixii ka horeeyey werarkii Tuko Raq in wadada labadaa maamul u dhaxaysa ay aad u nabdoonayd oo Baska kaa soo qaada subaxii hargeisa uu si nabd ah galabtii Garowe kuu soo gaarsiin jiray. Maantase waxay arrintii isu bedeshay aag dagaal oo ay suuragal tahay in daqiiqad kastaa uu ka qarxo dagaal qabyaaladaysan oo ay ka dhalan karo cawaaqib aan la mahadin.

Ugu danbayntii Soomaalida garashada u saaxiibka ah waa inay cod dheer ku dalbadan sii dayntii Buur Madow oo weliba ay meeshii colaad laga hurinayaba ee Soomaali degtaba ay yiraahdaan **‘Waar tolow Colka Jooja’**.